


# Thyroid Biopsy

The thyroid is a gland in the neck that makes and stores hormones. These hormones adjust your heart rate, blood pressure, body temperature and the rate that food is changed into energy. During a **thyroid biopsy**, small samples of cells are removed from the thyroid and sent to the lab for testing. Your doctor will review the results of your biopsy with you at your next visit and talk to you about treatment if needed.



**Arrive on time for your test.** You may be told to arrive 30 minutes before your appointment time. This test takes about two hours.

## During the Test


- You will lie on a table and may wear a hospital gown.
- The skin is cleaned.
- Numbing medicine is put into the skin. This may sting.
- An ultrasound, a machine using sound waves, is done to find lumps in the thyroid called nodules.
- When the site is numb, a small needle is put into the thyroid nodules.
- Some cells and tissue are pulled out in a syringe to be checked in the lab.
- The needle is then removed.

## After the Test

You may have bruising, discomfort and swelling at the biopsy site. If needed:

# Cad ka Jaridda Qanjidhka Troodhka

Qanjidhka troodhku waa qanjidh ku yaalla cunaha oo sameeya kaydiyanadheecaannada harmoonaadada. Dheecaannadani waxay simaan shaqada. Wadnaha, cadaadiska dhiigga, heer-kulka jidhka iyo sida cuntada loogu baddalo tamar. Marka lagaa goynayo inyar oo **qanjidhka troodhka**, waxaa laga soo jaraa cad yar ama unugyo yaryar, waxaan loo diraa shaybaadh. Dhakhtarkaagu wuxuu eegi doonaa jawaabta kasoo baxda baadhitaankaas, waxaana uu kaala hadli doonaa oo kuu sharxi doonaa marka labaad ee uu kusoo booqdo. Waxaana uu kuu sheegi haddii loo baahan yahay daawo.



**Kaalay xilligii lagu ballamiyey.** Waxaa lagu odhan karaa kaalay 30 daqiiqo ka hor xilliga ballanta. Baadhitaankani wuxuu qaadan karaa ilaa laba saacadood.

## Inta uu socdo baadhitaanku

- Waxaa lagugu jiifin doonaa miis, waxaana laga yaabaa in lagu xidho dharka dhakhtarka.
- Waa la nadiifinayaa jidhka.
- Dawo suuxdimeed ayaa la mariyaa meesha la goynayo. Xanuun baad dareemi kartaa.
- Mishiin ultrasound, kaasoo adeegsanaya mawjadaha codka (sound waves), ayaa lagugu sameeyaa si loo helo qanjidhada troodhka.
- Marka la suuxiyo meesha, waxaa lagu mudaa irlbad yar qanjidhka troodhka.
- Unugyo yaryar ayaa lagaga soo qaadaa siliij si loogu baadho shaybaadhka.
- Irbadda ayaa lagaa soo saaraa markaas.

## Baadhitaanka ka dib

Waxaa laga yaabaa inaad bararto, xanuunsato amay ku damqato halka lagaa jaray cadka. Haddii loo baahdo:

- Use over the counter pain medicine that does not contain aspirin.
- Apply an ice pack to the site to reduce swelling and bruising. Do not apply ice directly to the skin. Apply ice for 20 minutes and then take the ice off for at least 30 minutes.

Test results are sent to your doctor. Your doctor will share the results with you.

**Talk to the staff if you have any questions or concerns.**

- Adeegso dawo xanuun ilowsiis oo aanay ku jirin asbiriin.
- Dul saar baraf meesha lagaa qalay, si uu uga dhaco bararka iyo damqashadu. Si toos ah ha u saarin barafka jidhka. Ku hay barafka ilaa 20 daqiiqo, deedna ka daa barafka ilaa 30 daqiiqadood ugu yaraan.

Maxsuulka baadhitaanka waxaa loo dirayaa dhakhtarkaaga. Isaga ayaa dhakhtarkaagu kuu sheegi doona wixii ka soo baxay.

**La hadal shaqaalaha caafimaad haddaad wax su'aalo ah ka hayso ama shaki ka qabto.**

8/2007. Developed through a partnership of Mount Carmel Health, Ohio State University Medical Center, and OhioHealth, Columbus, Ohio. Available for use as a public service without copyright restrictions at [www.healthinfotranslations.org](http://www.healthinfotranslations.org).